

# Qaaxada (TB)

## Waa maxay Qaaxadu (TB)

TB waa cudur la kala qaado, waxana keena jeermiska TB. TB inta badan waxa uu haleelaa sambabada, balse wuu ku dhici karaa qayb kasta oo jidhka ka mid ah. TB waxa uu jiray qarniyaal badan.

### Sidee ayuu u fidaa?

TB waxa uu qofku ugu gudbin karaa qofka kale hawada. TB waxa la qaadi karaa marka qof qaba TB-ga sambabada uu qufoco ama hindhiso. Ma aha mid kalaqaadistiisu aad u sarreyso. Isu soo dhowaansho jooqto ah oo muddo dheer aad la yeelato qof qaba cudurka qaaxada (TB) ayaa lagu qaadi karaa cudurkan.

### Waa Maxay jeermiska Qaaxadu (TB)?

Dad badan oo neefsada Jeermiska TB-ga ayaa awoodi kara in ay joojiyaan in uu kobco. Hab-dhiska Difaaca Jidhka ayaa joojiya jeermiska TB-ga, waxana uu ka dhigaa mid aan falgal lahayn. Kaasi ayaa loogu yeedhaa Jeermiska Qaaxada, dadka noocaas ahina:

- Ma dareemaan xannuun/ ma laha calaamadaha cudurka
- **Ma fidin karaan** jeermiska TB-ga.
- Waxay leeyihiin baadhitaan in laga helay maqaarka (fiiro gaar ah: dadka qaba cudurada daciifiya habdhiska difaaca, sida macaanka, HIV iyo Kansarka waxa laga yaabaa in ay yeeshaan in aan xannuunka laga helin maqaarkooda, iyada oo xataa ay qabaan TB, dadka noocaas ah waxay u baahan yihiin in ay la tashadaan dhakhtarkooda)
- Qofku waxa ku dhici kara cudurka TB-ga oo falgal samaynaya mar dambe noloshiisa.

### Waa Maxay Cudurka Qaaxadu (TB)

Jeermiska TB waxa uu noqdaa mid falgal samayn kara marka habdhiska difaaca ee jidhku awoodi kari waayo in uu joojiyo jeermiska koritaankiisa. Jeermiska falgalka sameynaya ee TB-ga ayaa weynaada, dabadeedna waxyeelo u geysto jidhka. Calaamadaha cudurka TB waa:

- Qufac (oo gaadhaya in ka badan 3 toddobaad)
- Xumad/Qandho/Dhidid habeenkii
- Daal-dareemid
- Miisaanka oo aad hoos ugu dhaca/cunto xumo



Haddii cudurka TB uu ku dhaco qayb kale oo jidhka ka mid ah, calaamaduhu waxay ku xidhnaan doonaan halka uu TB-gu ku korayo, tusaale ahaan barar ku yimaada qanjidh ama laabatooyinka jidhka oo xannuuna.

## Waa Maxay baadhitaanada TB-gu?

Baadhitaanka TB-ga waxa lagu sameeyaa baadhitaan-maqaar. Qofka laga helay baadhitaanka maqaarkiisa macnaheedu waa in qofka uu jidhkiisa ku jiro jeermiska TB-gu. Baadhitaan caafimaad oo feedhaha la saaro raajo iyo xaakada oo la eego (xaakadu marka la qufaco waxay ka timaadaa feedha) ayaa lagu hubiyaa cudurka TB-ga.

## Sidee ayaa loo daaweeyaa TB?

Dadka qaba Jeermiska TB waxay ka faa'iidi karaan dawada oo ka hortagta cudurka TB. Dadka uu ku dhaco cudurka TB waa in ay dhammaystirtaan daaweynta si ay u bogsiiyaan cudurka. Daawooyinka TB-gu waa bilaash marka uu dhakhtar ka dalbado Caafimaadka Guud (Public Health). **TB waa laga hortegi karaa, lana daaweyn karaa!**

*Somali - Reprinted with permission of Toronto Public Health*



1-800-361-5653  
TTY: 1-866-252-9933

York Region Health Connection

**Community and Health Services**

Public Health

[www.york.ca](http://www.york.ca)

